people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Yaa kala wado Waxbarashada Dugsiyada

Kanada gudaheeda, xilka maamulka dugsiyada ay dadku wax ku bartaan wuxuu saaranyahay dowladda gobolka. Warqaddan gaaban waxay si sahlan oo kooban kuu faahamsiineysaa habka uu u dhisanyahay maamulka waxbarashada dugsiyada dadweynaha ee gobolka Ontario iyo xilka saaran iskuulada, guddiyada iskuulada iyo Wasaaradda Waxbarashadaba.

Wasaaradda Waxbarashada Gobolka

Wasaaradda Waxbarashada xilkeeda wuxuu yahay in ay guud ahaan kor ka maamusho habka waxbarashada gobolka Ontario oo idil. *Qodobka Waxbarashada* gobolka Ontario wuxuu si fiican u qeexayaa xilalka iyo mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin Wasaaradda Waxbarashada, guddiyada iskuulaadka, kormeereyaasha, maamuleyaasha, macallimiinta, waalidka iyo ardaydaba.

Mas'uuliyadda Wasaaradda waxay tahay:

- In ay dejiso shuruudaha ay isku maamuli lahaayeen guddiyada iskuulaadka
- In ay miisaaniyad u qoondeyso guddiyada iskuulaadka ayadoo isticmaaleyso Qaacidada ku saleysan Miisaaniyadda
- In ay dejiso manhajka waxbarashada gobolka (duruusta ay ardayda fasl kasta ku baran lahaayeen)
- In ay dejiso shuruudaha lagu qalin-jebiyo (shahaadada iyo dibloomada)
- In ay soo gudbiso liiska buugaagta dugsiyada lagu dhigo iyo wixii kalo oo waxbarashada ku saabsan

Wasiirka Waxbarashada waxaa magacaabo Madaxa dowladda gobolka (Premier) waana Mudane ka mid ah Baarlamaanka Gobolka (MPP).

Wasaaradda Waxbarashada waxaad kala xiriiri kartaa shabakadda **www.edu.gov.on.ca** ama waxaad ka wici kartaa telefoonka 1-800-387-5514.

Xafiiska Tayada Waxbarashada iyo Xil-dhowridda (EQAO)

Xafiiska EQAO waa hay'ad dowladeed oo madaxbanaan oo xilkeeda yahay in ay ilaaliso maamulka imtixaanaadka guud ee laga qaado ardayda dhigata fasallada 3aad , 6aad , 9aad , iyo 11aad . Waxay mas'uul ka tahay:

- In ay dejiso iyo in ay maamusho imtixaanaadka ku saabsan akhrinta, qoridda iyo xisaabta
- In ay natiijooyinka imtixaanaadka u soo gudbiso Wasaaradda iyo dad weynaha
- In ay soo gudbiso talooyin ku aadan sida ay ardayda u kordhin karaan natiijooyinka imtixaanaadkooda

Xafiiska EQAO waxaad kala xiriiri kartaa shabakadda **www.eqao.com** ama waxaad ka wici kartaa telefoonka 1-888-327-7377

Golaha maamulka Macallimiinta ee gobolka Ontario

Golaha maamulka Macaalimiinta ee gobolka Ontario wuxuu xukumaa xirfadda macallin-nimada. Mas'uuliyadda saaran waxaa ka mid ah:

- In uu dejio shuruudaha lagu qaato shahaadada macallinnimada iyo in uu dejio heerka barnaamijyada waxbarashada macallinnimada.
- In uu kaydio diiwaanka macallimiinta rasmiga ah
- In oo baaro cabashada laga soo gudbiyo macallimiinta

Golaha maamulka Macallimiinta ee gobolka Ontario waxaad kala xiriiri kartaa shabakadda **www.oct.ca** ama waxaad ka wici kartaa telefoonka 1-888-534-2222.

Guddiyada Iskuulaadka

Gobolka Ontario waxaa ka jira 72 guddi oo ay ku jiraan 31 guuddi oo wakiil ka ah dugsiyada dad weynaha oo afka Ingiriisiga wax lagu barto, 29 guddi oo wakiil ka ah dugsiyada Masiixiga oo afka Ingiriisiga wax lagu barto, 4 guddi oo wakiil ka ah dugsiyada dad weynaha oo afka Fransiiska wax lagu barto, iyo 8 guddi oo wakiil ka ah dugsiyada Masiixiga oo afka Fransiiska wax lagu barto. Waxaa kaloo jira guddiyo kale oo ka taliyo iskuulaadka ku dhexyaalo isbitaalaadka, xarumaha caafimaadka iyo tuulooyinka fog fog ee gobolka ka mid ah.

Guddiyada iskuulaadka waxay mas'uul ka yihiin

- In ay go'aamiyaan kharashka dhaqaalaha ay ka helaan dowladda gobolka sida inta lagu bixin karo miishaarka macallimiinta iyo shaqaalaha kale, kharashka iskuulaadka iyo dayactirkooda iyo soo gadidda qalabka iskuulaadka looga baahanyahay
- In ay go'aamiyaan goobta iskuul cusub laga dhisi doono iyo goorta iskuul la xiri doono iyo sababta
- In ay iskuulaadka u abuuraan barnaamijyo sida barnaamijyada ardayda baahida gaarka ah qabta, barnaamijyada loogu tala galay dadka soo galootiga ah, iyo barashada luqadda Fransiiska
- In ay dejiyaan shuruuc hoosaadka lagu maamulo dugsiyada (sida sharciga nabad gelyada iskuulka, casharrada guriga loo qaato)
- In ay dejiyaan qorshaha dhaqaalaha sanadlaha ah ee ku baxa guddiga iskuulka
- In ay hubiyaan in uu dugsiga wax ku maamulo habka uu qeexayo Qodobka Waxbarashada
- In ay u abuuraan dugsi kasta guddi hoosaad iyo Guddi u qaabilsan Waalidka ka Qebgalkiisa arrimaha Iskuulka ka socdaa oo intaba la wada shaqeeyo guddigoodan



People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.
You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
phone: 416-534-0100 fax: 416-536-0100 e-mail: info@peopleforeducation.com or visit: www.peopleforeducation.com

Hanti-dhowreyaal waa dadka marka ay socoto doorashooyinka gobolka loo doorto in ay ka mid noqdaan guddiga iskuulka. Waxay wakiil ka yihiin danta waalidka iyo ardayda deegaankooda deggan. Hanti-dhowreyaasha waxay ka qeyb galaan guddiga go'aamiyo ceyrinta ardayda, waxayna go'aamiyaan kharashka ku baxa guddiga iskuulka. Haddii aad u baahato magaca hanti-dhowraha deegaankaada waxaad ka heli kartaa xafiiska iskuulka ama waxaad ka fiirin kartaa shabakadda guddoonka waxbarashada.

Kormeerayaasha iskuulaadka ama "horjoogeyaasha" waa adeegayaasha u shaqeeyo guddiga iskuulka waxayna guddiga wakiil uga yihiin dhowr iskuul. Waxaa laga yaabaa in kormeerayaasha ay ka qeybqaataan arrimaha ku aadan rafcaanada ay ardayda ka qaataan eryiddooda, kulannada lagu gaaro go'aanada waxbarashada ardayda baahida gaarka ah qabta iyo fadhiyo kale oo iskuulka uu qabto oo laga codsato in ay ka soo qeyb galaan oo aanan ka mid ahayn waxbarashada guryaha lagu qaato. Guddiga wuxuu kormeerayaasha u magacaabi karaa oo kale in ay kormeeraan barnaamijyo farabadan (sida, magacaabidda Horjoogaha waxbarashada gaarka ah). Haddii aadan taakuleyn fiican ka helin maamulaha dugsiga waxaad la xiriiri kartaa kormeeraha iskuulka deegaankaada.

Liiska magacyada guddiyada iskuulaadka gobolka oo idil waxaad ka heleysaa shabakadda ah:
http://esip.edu.gov.on.ca/english/core/BoardDirectory.asp

Iskuulaadka

Maamuleyaasha waxay mas'uul ka yihiin maamulka iskuulka ay joogaan. Waxay yeelan karaan hal ama in ka badan oo maamule ku xigeen ah si ay u caawiyaan. Maamulaha mas'uuliyadda saaran waxay tahay:

- In uu kormeero waxbarashada iyo manhajka iskuulka iyo in uu go'aamiyo Qorshaha Horumarinta Iskuulka
- In uu maareeyo macallimiinta iyo shaqaalaha kale
- In uu ardayda cusub iskuulka ku qoro iyo in uu go'aan ka gaaro ardayda baahida waxbarashada gaarka ah qabto
- In uu maamulo dhaqaalaha iskuulka iyo in uu ka warqabo dayactirka iskuulka uu u baahanyahay
- In uu go'aamiyo qoridda shaqaalaha xirfadda gaar ah leh sida horjoogayaasha qeybaha, xirfadleyaasha farshaxanka ama shaqaalaha maktabadda
- In uu kaydiyo diiwaanka ardayda iyo in uu hubiyo in waalidka loo diro natiijada waxbarashada caruurtooda
- In uu ka warqabo ardayda aadaabtooda iyo in uu go'aamiyo ganaaxidda ardayda iyo ka eryiddooda iskuulka
- In uu la shaqeeyo golaha iskuulka si uu u dhiiri geliyo ka qeybgalka waalidka arrimaha iskuulka, in uu ka qeybgalo go'aanada dhaqaale raadinta iyo in uu dejiyo sharciyada cusub sida kuwa ku saabsan waxbarashada guriga loo qaato iyo Qodobka Asluubta Iskuulka

Macallimiinta gobolka Ontario waa in ay leeyihiin shahaado macallinnimo oo muctarif ah si ay iskuulaadka dad weynaha macallimiin uga noqdaan. Mas'uuliyadda saaran macallimiinta waxay tahay:

- In ay diyaariyaan casharada, fasalada wax ka dhigaan, iyo in ay qeymeeyaan horumarka ardayga
- In ay dhowraan aadaabta ardayga marka fasalka lagu jiro
- In ay bixiyaan casharada isboortiska ee ka baxsan manhajka, abaabulaan ururro kooxeed iyo waxqabadyo kale (si iskaa wax u qabso ah)
- In ay la socodsiiyaan waalidka horumarka waxbarashada caruurtooda

Golaha iskuulada waxay talooyin siiyaan maamulaha iyo guddiga iskuulka. Iskuulkasta waa in uu leeyahay gole, xubnahiisana uu ka koobnaado waalidiinta, maamulaha, hal macallin, hal arday (dugsiga sare marka laga hadlaayo), shaqaale aan macallin ahayn iyo xubin deegaanka wakiil ka ah. Xubnaha badankood waa in ay ahaadaan waalidiin, guddoomiyahana waa in uu noqdaa ruux waalid ah. Maamulaha cod kuma laha go'aanada golaha iskuulka. Mas'uuliyadda saaran golaha Iskuulka waxay tahay:

- In ay xogwarranka la qeybsadaan waalidiinta iyo dadka deegaanka si ay uga helaan talooyin ku aadan arrimaha horyaala
- In ay talooyin siiyaan maamulaha iyo guddiga iskuulka kuwaas oo ku aadan jadwalka iskuulka ee sanadka, qorshaha ku aadan horumarinta iskuulka, asluubta iyo labiska ardayda, shuruudaha lagu xusho maamuleyaasha, iyo sharciyada guddiga soo saaro oo dhibaato ku noqon karo iskuulka

Xubno fara badan oo ku jira golaha iskuulada waxay qeyb wacan ka qaataan isku dubaridka xafladaha iskuulka uu qabto iyo dhaqaale raadinta.

Haddii aad rabto warbixin dheeraad ah oo ku saabsan golaha iskuulka ka fiiri shabakadda:

http://www.edu.gov.on.ca/eng/general/elemsec/council/guide.html

Faah faahin dheeraad ah

Haddii aad rabtid faah faahin dheeraad ah oo ku saabsan habka waxbarashada Ontario iyo sida aad uga qebgali lahayd waxaad kala xiriiri kartaa:

People for Education at : **www.peopleforeducation.com**

The Ontario Association of Parents in Catholic Education at: **www.oapce.on.ca**

The Ontario Federation of Home and School Associations at: **www.ofhsa.on.ca/**

The Ontario Trillium Foundation / La Fondation Trillium de l'Ontario

This tip sheet was developed with the support of the Ontario Trillium Foundation.

Copies are available in several languages at www.peopleforeducation.com.
For more information, call 416-534-0100 (toll-free 1-888-534-3944) or email info@peopleforeducation.com
© People for Education 2008